


## Guuritaan la fududeeyay

Hagahan ayaa loogu talagalay inuu kaa caawiyo habka aad u marayso u guurista gurigaaga cusub.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan iimayl u dir

[relocationteam@homes.vic.gov.au](mailto:relocationteam@homes.vic.gov.au)

ama taleefan ku wac **1800 716 866**  
ama la xidhiidh xafiiska guryaynta  
deegaankaagakabacdina xubin ka mid  
ah kooxdayada raritaanada u heellan  
aya dib kuugu soo warcelin doona



Ma u baahan tahay nooca  
la heli karo ama la fasiray ee  
cusboonaysiinta mashruucan?

Haddii aad jeelaan lahayd inaad  
ku hesho daabacaadan qaab la heli  
karo ama la fasiray, fadlan iimayl u dir  
[enquiries@homes.vic.gov.au](mailto:enquiries@homes.vic.gov.au)

Waxaa ogolaaday oo daabacay Dowladda Victoria,  
1 Treasury Place, Melbourne. © Gobolka Victoria, Homes  
Victoria (Agaasimaha Guriyeynta), Sebtembar 2023.  
Waxaa daabacay Finsbury Green, Melbourne Victoria  
(HV013623). ISBN 978-1-76096-682-9

**hv** homes  
victoria

**VICTORIA**  
State  
Government

Families,  
Fairness  
and Housing

**hv** homes  
victoria

## Hagahaaga dib u dejinta



**VICTORIA**  
State  
Government

Families,  
Fairness  
and Housing

# Hagaha Dib u dejinta oo Talaabo Talaabo kuugu sharaxaya



## Marxaladda 1aad

Inaad heshid gurigaaga

- 1 Kooxdidayada Dib-u-dejinta ayaa ku soo wici doonta si ay ballan kuugu sameeyaan oo ay kaagala hadlaan habka dib udejinta.



- 2 Waanu kula kulmi doonaa si aanu uga wada hadalno baahiyahaaga guuritaan, meelaha aad ka doorbidayso guryaha iyo habka aad u codsan karto. Xubnaha qoyskaaga, iyo adeeg kasta oo taageero ah, sida turjubaano, ayaa sidoo kale iman kara.



- 3 Marka waraaqahaaga la helo, codsigaaga waa la xerayn doonaa waxaana laguu soo diri doonaa warqad xaqijin ah. Kooxdidaydu waxay meelaha aad doorbidayso kaaga raadin doonaan guryaha la heli karo.



## Marxaladda 2aad

Qorshaynta guuritaankaaga

- 4 Marka guri kugu habboon la helo, waxaa lagu siin doonaa fursad aad kusoo aragto oo aad go'aan uga gaarto gurigaas.



- 5 Haddii aad aqbasho guriga, waanu kula soo xiriiri doonaa si aan u ogaano maalinta guuritaanka kuugu habboon adiga iyo qoyskaaga. Marka taariikhda lagu heshiiyo, kooxdidaydu waxay ballansan doonaan kuwa wax rara (kuwaas waxaa lacagtooda bixin doona Homes Victoria).



- 6 Kooxdidaydu waxay kuu soo diri doonaan alaabta baakadaha si aad alaabtaada ugu xirto taariikhda guuritaanka ka hor. Fadlan ka saar alaabta aadan rabin gurigaaga.



## Marxaladda 3aad

Maalinta wax la saxiixayo

- 7 Maalin la qorsheeyay, waad saxiixi doontaa oo waxaadnaa heli doontaa furayaasha gurigaaga cusub.



## Marxaladda 4aad

Maalinta guriga lagu guurayo

- 8 Kuwa wax raraya ayaa maacuuntaada iyo alaabahaaga kale geyn doona gurigaaga cusub.



## Qoraal muhiim ah

Waxaad saxiixi doontaa ogeysiiska aad ku joojinayso kiraysiga gurigaagi hore oo soo celi furayaasha. (Tani waxay kaa ilaalinaysaa in lagaa qaado kirada labada guri).

U dir rasiidhada Kooxda Dib-u-dejinta si ay kuugu soo celiyaan goynta iyo isku xidhka adeegyada - sida adeegyada korontada iyo telefoonka.